

Shuruudaha Tababarka Adeeg bixiyaha Qoyska, Saaxiibka iyo Dariska (FFN)

Adeeg bixiyaasha Qoyska, Saaxiibka iyo Dariska (FFN) waxaa qasab ku ah inay buuxshaan shuruudaha tababarka haddii ay adeeg siiyaan carruur hesha lacagta kaalmada ah ee gobalka.

Adeeg bixiyaasha aan qaraabada ahayn, "saaxiibka iyo dariska" waxay haystaan 90 maalmood oo laga bilaabo taariikhda ogolaanshaha inay buuxiyaan ayna diiwaan galiyaan tababarka caafimaadka iyo badbaadada. Halkan hoose ka eeg liiska tababarka oo dhammaystiran.



Sadexda tababar ee hoos ku qoran ayaa KALIYA laga doonayaa adeeg bixiyaasha FFN ee aan qaraabada la ahayn carruurta.



Tababarka Amaanka iyo Caafimaadka ee ay ogoshahay DCYF

Kaliya la marsiinaayo adeeg bixiyaasha FFN ee aan qaraabada la ahayn ilmaha (2 saacadood ayuu soconayaa)

Tababarka Amaanka iyo Caafimaadka waxaad ku helayaa si toos ah iyo barta khadka tooska ah ee www.dcyftraining.com asagoo ku qoran Af Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali. Si aad iskaga diiwaangeliso tababarka shaqsi ahaan booqo: tinyurl.com/imagin-dcyftraining.

Haddii aad horay u gashay Tababarka Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta ama Shahaadada Hore, horay ayaad u buuxisay shardiga tababarka. Si aad arintaan xog badan uga ogaato booqo tinyurl.com/CCB-info.



Tababarka DCYF ee Badbaadada Hurdada

Kaliya la marsiinaayo adeeg bixiyaasha FFN ee daryeelka siinaaya ilmaha dhawaan dhashay (1 saac ayuu soconayaa)

Tababarka Badbaadada Hurdada waxaad ka helayaa barta khadka tooska ah ee www.dcyftraining.com asagoo ku qoran Af Ingiriis iyo Isbaanish.



Gurmadka Degdega ah ee Ilmaha yar, Carruurta, Dadka Waawayn Iyo Daawaynta Wadnaha (CPR)

Kaliya la marsiinaayo adeeg bixiyaasha FFN ee aan qaraabada la ahayn ilmaha (6-8 saacadood ayuu soconayaa)

Tababarka Gurmadka Degdega ah iyo CPR ma bixiyaan DCYF. Tababarka waa in lagu qaataa shaqsi ahaan si toos ah loo galo adeeg bixiyuhuna waa inuu tusaa xirfadaha uu bartay uuna tusaa macalinka. Si aad u hesho tababar lagu samaynaayo deegaankaaga, la xariir ururada bulshada sida Laan qayrta Cas, waaxda dabdamiska ee deegaankaaga, kaniisadaha, kuleejyada, iwm., ama ka baar interneetka si aad u hesho dookhyo dheeraad ah.

Tababarka hoose waxaa laga doonayaa dhammaan adeeg bixiyaasha FFN



Tababarka Kaalmada Biilka ee Qasabka ah

Oo la marsiinaayo labadaba adeeg bixiyaasha FFN ee qaraabada la ah ilmaha iyo kuwa aan la ahaynba (4 saac ayuu soconayaa)

Tababarka Kaalmada Biilka waxaa laga heli karaa qof ahaan, khadka tooska ah ama iswada ah oo ku qoran Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan tababarka booqo: tinyurl.com/FFN-SubsidyBilling with <https://imaginewa.org/subsidy-billing-eas-ffn/> ama la xariir Kooxda Caawinta Farsamada ee loo yaqaan Imagine Institute, iimayl ta@imaginewa.org ama ka wac 206-492-5249.

Fadlan ogoow: Kadib markad dhameeyso tababarka, gobalka ayaa siin doono adeeg bixiyaasha FFN, ee daryeelka siiya carruurta qaata kaalmada lacag dhan labaatian doolar (\$20).



Tababarka Nidaamka Xaadirinta Casriga ah ee DCYF

Oo la marsiinaayo labadaba adeeg bixiyaasha FFN ee qaraabada la ah ilmaha iyo kuwa aan la ahaynba (2 saac ayuu soconayaa)

Tababarka Nidaamka Xaadirinta Casriga ah waxaa laga heli karaa, barta khadka tooska ah ee www.dcyftraining.com ama oo iswada ah oo ku qoran Ingiriis, Isbaanish iyo Soomaali. Wixii xog ah oo ku saabsan tababarka, booqo: tinyurl.com/dcyf-eas.

Ma doonaysaa xog dheeraad ah?

Webseetka: tinyurl.com/FFNReqs

Taleefanka: 866-482-4325 ,dookha 8

Email: dcyf.ffc@dcyf.wa.gov

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dhukumanti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYC Xidhiidhiyaha Qaybaha Taleefanka) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.

DCYF PUBLICATION EPS_0020 SM (11-2023) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES